

2016 ka Arjiga Warqadda Codbixinta Maqanaha ee Minnesota

Arjigaaga ku gudbi bogga internetka <http://www.mnvotes.org> -ama-

Buuxi sadarada 1 ilaa 7 ee hoose. Fadlan si fasiix ah u qor.

Sida ugu dhakhsaha badan u soo celi arjigan. Waa in warqadaha codbixinta la soo celiyaa ugu dambayn maalinta doorashada si loo tiriyo.

Muhiim: Ciidamada shaqeeya waqtiga buuxa (full time) iyo codbixiyayaasha dalka ka maqan waa in aysan isticmaalin arjigan. Dhinaca kale ka eeg macluumaad dheeri ah.

1.	warqadda codbixinta maqanaha ee loo codsado doorashada (yinka) soo socda (<i>haddii aan doorashana la calaamadayn, warqadda codbixinta waxaa boosta loo soo dhigi doonaa doorashada xigta oo kaliya</i>) labada doorashada tan aasaasiga (doorashada musharaxiinta xisbiyada) iyo tan guud doorashada aasaadiga oo gaar ah – taariikhda cadday: doorashada aasaasiga oo kaliya doorashada guud oo gaar ah – taariikhda cadday: doorashada guud oo kaliya
-----------	---

2. magaca dambe ama awoowaha	magaca koowaad	magaca dhexe ama aabaha	magaca la raaciyoo (suffix)
-------------------------------------	----------------	-------------------------	-----------------------------

3. taariikhda dhalashada (bb/mm/ssss)	degmada aad ku nooshahay	lambarka taleefoonka
cinwaanka emailka		

4.	calaamaday dhammaan sanduuqyada ay saamayso: Waxaan leeyahay shati dareewal oo MN ay bixisay ama warqad aqoonsi oo MN bixisay. Lambarku waa: Waxaan leeyahay Sooshaal Sekuurad Lambar. Afarta lambar oo u dambeeyaa waa: XXX-XX- Ma lihi shati dareewal ee MN, Warqad Aqoonsi ee MN ama Sooshaal Sekuurad Lambar. Lambarkaaga Aqoonsiga waxaa la barbardhigi doonaa kan ku yaal baqshaddaada codbixinta maqanaha.
-----------	--

5.	cinwaanka meesha aad ku nooshahay (guriga)	qolka (apt.)	magaalada	MN	lambarka boosta (zip code)
-----------	--	--------------	-----------	-----------	----------------------------

6.	cinwaanka loo dirayo codbixinta maqanaha ee aad leedahay	qolka (apt.)	magaalada	gobolka	lambarka boosta (zip code)
-----------	--	--------------	-----------	---------	----------------------------

7.	Waxaan caddaynayaa in: <ul style="list-style-type: none"> • aan anigu naftayda u buuxinayo arjigan; • ugu yaran da'daydu noqon doonto 18 maalinta doorashada; • aan ahay muwaadin Maraykan ah; • aan ku noolaan doono Minnesota 20 ka maalmood ee ka horeeyay maalinta doorashada; • aan degganahay cinwaanka ku yaal arjigan; • aanan amar maxkameed cidna ku hoos joogin kaasoo igala noqonaya xaqqayga codbixinta; • aanan maxkamadi xukumin in sharci ahaan aanan codayn karin; • aan xaq u leeyahay in aan codeeyo sababtoo ah, haddii la igu xukumay dembi culus, waa dhacay waqtigii dembigaas culus (waa la dhammaystiray) ama waa la iga dhaafay ciqaabta xukunkii igu dhacay; iyo • aan akhriyay fahmayna caddayntan: Macluumaadka kor ku qoran waa sax, waxaan saxiixayaa foomkan arjiga ah anigoo og ciqaabta been abuurka, dembi culus ciqaabtiisuna noqon karto xarig aan ka badnayn 5 sano, ganaax aan ka badnayn \$10,000, ama labadaba. Saxiix halkan: X _____ taariikhda ____/____/____
-----------	---

Bogga kale ka eeg tilmaamo gaar ah ee ku saabsan codbixiyaasha itaalka daran ama leh awoodda wakiilnimada.

official use only

Primary → <input type="checkbox"/> reg <input type="checkbox"/> non-reg	received date	ballot issued date	initials	type M C HCF	reason replaced <input type="checkbox"/> rejected <input type="checkbox"/> lost <input type="checkbox"/> spoiled <input type="checkbox"/> never received	repl. date:	precinct
General → <input type="checkbox"/> reg <input type="checkbox"/> non-reg	received date	ballot issued date	initials	type M C HCF	reason replaced <input type="checkbox"/> rejected <input type="checkbox"/> lost <input type="checkbox"/> spoiled <input type="checkbox"/> never received	repl. date:	school district

Sida ugu dhakhsiiyaha badan ee suurtagalka ah u soo celi arjigan:**Meesha loo celiyo arjigaaga**

Waa in aad u celisaa xafiiskaaga doorashada ee deegaankaaga. Haddaan kor laguugu sheegin, macluumaadka lagula xiriiri karo sarkaalka doorashada ee xafiiskaaga waxaad ka heli kartaa hoosta "Election Official Directory" ("Tusaha Rasmiga ah ee Doorashada") <http://www.mnvotes.org>.

Siyaabaha kala duwan ee loo soo celin karo arjiga codbixinta maqanaha

Wixii ah doorashooyinka federalka, gobolka ama degmada, arjiga codbixinta maqanaha ku soo gudbi bogga internetka ee <http://www.mnvotes.org>. -AMA- Warqadda codbixinta maqanaha arjiyadeeda waxaa lagu soo celin karaa boostada, fakis ama sidii lifaaq la socda email.

Goormaa lagu soo dirayaa warqadda codbixinta

Qalabka codbixinta maqanaha waxaa lagu soo dirayaa ugu yaraan 46 maalmood ka hor doorashada, (marka laga reebo doorashooyinka magaalada oo la qabto bisha 3aad (March) oo qalabkooda la soo diri doonaa 30 maalmood doorashada ka hor). Haddii aad codsato maalintaa ka dib, warqaddaada codbixinta waxaa lagu soo dirayaa marka arjigaaga la helo. Haddii aadan warqaddaada codbixinta helin la xiriir sarkaalka doorashada ee deegaankaaga. Si aad u hubiso meesha ay marayso warqaddaada codbixinta maqanaha, booqo <http://www.mnvotes.org>.

Ogaysiiska Asturanaanta

YTaariikhda dhalashadaada saxda ah, cinwaanka emailkaaga, iyo wixii lambaro aqoonsi ee aad bixiso (Shatiga dareewalka Minnesota, Warqadda Aqoonsiga ee gobolka ama afarta lambar ee ugu dambeeya Sooshaal Sikuuradka) waa asturanyihiin.

Saraakiisha doorashadu waxay kuu waydiiyaan taariikhdaada dhalashada saxda ah waa in ay isu fiiriyaan arjigaaga iyo diiwaanka codbixintaada. Haddii aad diido in aad sheegtid taariikhdaada dhalashada saxda ah, ma helaysid warqadda codbixinta maqanaha.

Saraakiisha doorashadu waxay kuu waydiiyaan emailkaaga si ay kaagala xiriiri karaan arrimaha arjigaaga. Sidoo kale, Xafiiska Xoghayaha Gobolka ayaa email kuu soo diri kara (ama si kale kuula xiriiri kara) arrimaha ku saabsan codbixinta iyo doorashada, ama ku weydiin kara ra'yiga bulshada. Haddii aad diido in aad email sheegto, bogga internetka kama codsan karto codbixinta maqan waana in aad ku codsataa arji warqad ah.

Saraakiisha doorashadu waxay kuu waydiiyaan lambarka warqadda aqoonsiga si ay u hubiyaan in qofka codka bixinayaa uu yahay isla qofkii codsaday codbixinta. Haddii aad leedahay lambarka warqadda aqoonsiga laakiin aad diido in aad sheegto, waxaa suurtagal ah in warqadda codbixinta maqanaha lagu diido, awoodna u yeelan maysid in aad internetka ka ogaatid meesha ay marayso warqaddaada codbixinta maqanaha.

Inta kale ee ah macluumaadka ku qoran arjigaaga waa mid dadweynaha u furan marka loo isticmaalo doorashada, siyaasadda ama ujeedooyin nabadsugid. Haddii aad doonaysid in macluumaadkaaga xiriirka ay asturnaadaan ama qarsoodi ahaadaan sababo amni awgeed, wac 1-877-600-8683 si aad u ogaatid waxaad samayn karto.

Yaa soo codsan kara warqadda codbixinta

Qof walbi waa in uu naftiisa u codsadaa. Waa dembi culus in caddayn been ah lagu qoro arji lagu codsanayo warqadda codbixinta maqanaha, in la isku dayo in la bixiyo cod aan sharci ahayn, ama qofna lagu taageero in uu bixiyo cod aan sharci ahayn.

Haddii aad u malaynayso in aadan u diiwaangashanayn codbixinta

Haddii aadan ka diiwaangashanayn deegaanka sharciga ah ee cinwaanka aad dhiibtay, waxaa lagu soo diri doonaa arji aad ku codsato diiwaangelin codbixinta oo ay la socdaan qalabka codbixintaada.

Macluumaad ku saabsan ciidamada shaqeyya waqtiga buuxa (full time) iyo codbixiyayaasha dalka ka maqan

Haddii sababta aad u codsanaysid warqadda codbixinta maqanaha ay tahay in adiga ama qoyskaagu aad tihiin ciidamada shaqeyya waqtiga buuxa (full time) ama aad dalka ka maqnaandoontid iyo/ama aad joogtid meel ka baxsan xuduudda Maraykanka, [ha isticmaalin arjigan](http://www.mnvotes.org). Waxaad xaq u leedahay ilaalin gaar ah haddii aad codsanaysid adiga oo isticmaalaya Federal Postcard Application (Arjiga Kaarka Boostada ee Federaalka). Wixii ah macluumaad dheeraad ah iyo in aad arjigaaga ku gudbisid internetka, tag o <http://www.mnvotes.org>.

Siyaabaha kala duwan ee aad samayn kartid haddii aad itaal darantahay tahay

Waxaad samayn kartaa:

- adiga naftaadu saxiix arjiga
- calaamad ku samay, ama
- waydiiso qof kale in uu kuu saxiix adiga oo jooga (qofku magiciisana ka ku saxiix kaaga ka dib.)
- haddii aad la qabsatay in saxiixaaga aad shabad u isticmaasho waxyaabaha aad saxiixdo oo dhan, waad ku saxiixi kartaa shabadda ama qof kale waydiiso in uu isticmaalo saxiixaaga shabadda adiga oo jooga. (Eeg Xeerka Minnesota, qaybtiisa 645.44, qayb-hoosad 14.)

Macluumaadka ku saabsan awoodda wakiilnimada

Codbixinta laguma samayn karo awoodda wakiilnimada. Awoodda wakiilnimadu waxay khusaysaa oo kaliya arrimaha saameeya hantida. Qofka leh awoodda wakiilnimada waa kuu saxiixi karaa oo kaliya adiga oo jooga, sida kor loogu soo sheegay. (Eeg Xeerka Minnesota, qaybtiisa 523.24, qayb-hoosad 14.)